



Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo saabsan CODSIGA ISBEDELKA ARDAYGA dhibic ISKA SIIB XAALADDA

Dhammaan ardayda raaca Adeegaha Gaadiidka Iskuulada Dadweynaha Portland oona loogu qoondeeyay baska Ed ee Gaarka ah ama adeega gaariga si ootamaatig ah **waa in uu kula kulmo albaabka baska iskuulka ama taksiga qof masuul ah.** Xaaladaan kadagida gaariga ootamaatiga ah waxay ahaanaysaa mid sii jirta illaa uu kadhaco isbedel oggolaansho lasixiixey ee kusaabsan fayl loo diro Waaxda Gaadiidka Degmada.

1. Maxaa dhacaya haddii ilmahaaga ay khasab tahay in lala kulmo laakiin aanan awoodin in aan imaado boosteejada baska waqtigii loogu talagalay?

Haddii ay khasab tahay in ilmahaaga lala kulmo oona qofna aan joogin boosteejada baska si meesha loogula kulmo, baska ama baabuurka yar wuxuu gaynayaa ilmahaaga xarunteena daryeelka ilmaha degdega ah middaas oo kutaala:

Naadiga Carruurta:

3520 SE Yamhill St.

Portland, OR 97214

503-223-2346

Telefoonka Gacanta: 503-781-3328

Keenida la keeno ilmahaaga xaruntaan waxay dammaanad qaadaysaa in ilmahaaga uu qabbo ilaaliye illaa hadhow lagala kulmo. Xaruntaan waa in aanan loo isticmaalin sida meel loo geeyo ilmaha-daryeel maalin le ah.

Haddii aad u baahantahay in uu qofkale kula kulmo ilmahaaga boosteejada baska, fadlan kalaxiriir xafiiskeena lambarkan 503-916-6901 si aynu ugu sheegno daraawalka in uu jiro qofkale oo la oggolaaday midkaas oo qaadan kara ilmahaaga. Daraawalka wuxuu weydiinayaa xaqiijinta Aqoonsiga qofka haddii aan qofku ahayn mid layaqaano.

2. Ma noqon karaa wiilkayga/gabadhayda qofka masuulka ah in uu la kulmo ilmahaaga?

Ka waalid ahaan, adiga ayaa gaaraya go'aanka ah qofka kanoqonaya masuulka daryeelka ilmahaaga. Naseexada ama talada Degmadu waxay tahay in qofka masuulka ahi uu noqdo qof jira laba iyo toban sanno ama kaweyn. Xaalada halka daraawalkeena ama shaqaalaha uu qabbo masuuliyad welwel kusaabsan ammaanka ilmaha, waxaan sameyn doonaa isku dayo ah in aynu kula soo xiriirno kadibna kooxda IEP u codeeyo ama maqlo welweladeena. Ammaanka ardayga waa mudnaanteena ugu sareysa.

3. Maxaan ugu baahanahay in aan soo diro codsi cusub marka uu ilmahaagu bedelo iskuulada?

U baahashada codsi cusub marka uu ilmuhu bedelo iskuulada, Waaxda Gaadiidka waxay hubsanaysaa ama dammaana qaadaysaa in warqadeena shaqadu ay tahay mid hadda ah oona khuseyso iskuulka xadidan, waddooyinka iyo waqtiyada gambaleelka loogu talagalay ardaygaaga.

4. Miyaan codsan karaa in ardaygayga iskuulka kahor/caruurimo xili hore kujira laga tago asaga oo aan loogu imaanin meesha lagu soo dajiyo?

Ardayda dhigta iskuulka xanaanada, iskuulka kahor iyo barnaamijyada waxbarashada hore looma oggolaan doono in looga tago imaatin la'aan boosteejada baska. Qof masuul ah ayay khasabtahay in uu meesha joogo si loo habsado ama loo dammaana qaado ammaankooda.

5. Maxaan ugu khasbanahay in aan sugo Xafiiska Gaadiidka si uu u “hawl geliyo”codsigayga? Daraawalka wuxuu hore u sheegay in uu sameyn karo.

Marka uu hawl geliyo xafiiska codsiga, waxaa lagelinayaa xogteena macluumaadka waxaana la bilaabayaa warqad shaqo cusub. Middaana macnaheedu waxay tahay haddii uu daraawalkaaga caadiga ah uu maqanyahay, kawarqabaha daraawaliinta, xiriiryaasha raadiyaha iyo shaqaalaha taageerada ayaa oggaan doona xaalada saxda ah ee ilmahaaga. Xaaladeena caadiga ahi waxay tahay in dhammaan ardayda ay khasabtahay in lala kulmo daraawaliinteenana waxaa lagu tababarey in ay raacaan warqadooda shaqada.